Magalayo Janada Qofka gooya Qaraabada

Jubeyr Binu Mudcim Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu ka maqlay Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee isagoo dhahaya: "Magalayo Janada Qofka gooya Qaraabada."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Qofka Qaraabadiisa ka gooya waxay waajib ahaan ugu leeyihiin ee xuquuq ah, ama dhib iyo xumaan kula kaca, wuxuu mutaysanayaa inuusan Janada gelin.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/5367